UNSOM



# KU NAALOONSHIYAHA AAN SUGNEYN EE XORRIYADA HADALKA EE SOOMAALIYA

SEBTEMBER 2018

## Warbixinta oo Kooban

Warbixintan waxaa soo saaray Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM) iyadoo ku salaysan waajibaadka loo igmadey UNSOM, sida ku qeexan Qaraarka Golaha Amaanka Qaramada Midoobay 2158 (2014) ee ahaa inay kormeerto, gacan ka geysato baaritaanka iyo inay warbixin u soo gudbiso Golaha, iyo inay ka caawiso ka hortagga ku tacaddiyada ama xadgudub kasta ee loo geysto xuquuqda aadanaha ama xadgudubyada sharciga caalamiga ah ee bini'aadannimada ee xilliga colaadaha hubaysan ee ka dhaca Soomaaliya.
Warbixintu waxay qiimeyneysaa horumarka la gaaray iyo caqabadaha soo wajahay tan iyo markii la soo saaray warbixintii UNSOM/OHCHR bishii Agoosto 2016, ee ku saabsanayd Xoriyadda Hadalka ee Soomaaliya. Waxayna falanqeyneysaa xadgudubyada iyo tacaddiyada la xiriira oo/ama saameeya xaqa xorriyadda hadalka ee ay Kooxda Xuquuqda Aadanaha iyo Ilaalinta ee UNSOM (HRPG) diiwaangelisay laga soo billaabo 1dii Agoosto 2016 ilaa 31kii Luulyo 2018, oo ay ku jiraan dilal, garaacis, dhibaateyn/kadeedid, xayiraad sharci darro ah, iyo xarig sharci darro ah, nidaam cadaalad ah oo la raaco ama maxkamadeyn cadaalad ah oo la dammaanad qaado la'aantood, iyo xiritaanka/xannibaadda xarumaha warbaahinta. Warbixintu waxay qiimeyneysaa hirgelinta talooyinkii Warbixintii 2016 ee UNSOM/OHCHR iyo Warbixintii Dib-u-eegis Xiliyeedka Caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka (UPR) ee Soomaaliya, lana xariira xorriyadda hadalka, ilaalinta saxafiyiinta iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta, iyo maxkamadeynta kuwa geystay xadgudubyada iyo tacaddiyada ka dhanka ah saxafiyiinta, shaqaalaha kale ee warbaahinta iyo siyaasiyiinta.

Waxaa la sameeyay xogaa horumar ah, intii lagu guda jiray diyaarinta warbixintan, gaar ahaan wax ka beddelidda xeerka saxaafadda. Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) ayaa taageertay wax ka beddelidda Sharciga Warbaahinta ee heer Federaal, oo illaa bishii Agoosto 2018 horyaallay Baarlamaanka Federaalka si looga yeesho wadatashi dheeraada, loona ansixiyo. Hase yeeshee, qoraalka sharciga waxaa ku jira qodobo ay xirfadlayaasha saxaafaddu u arkaan kuwo dhibaato leh. Haddii Baarlamanku aanu wax ka qabanin cabashooyinkan, ku naaloonshiiyaha xoriyadda hadalka ayaa weli sii ahaan doonta mid ay caqabadi hor taagan tahay. Baarlamaanka Puntland ayaa 6dii Disembar 2016 ansixiyay in wax laga bedelo Sharciga Warbaahinta, halka mas'uuliyiinta Jubbaland ay wadatashi ka yeesheen Xeerka Warbaahinta bishii November 2017.

Inkasta oo ay jiraan dadaallo ku aaddan xaga sharci-dejinta, hadana xadgudubyada iyo tacaddiyada ku saabsan xaqa xorriyadda hadalka ayaa weli sii socday, lanan diiwaangeliyey muddadii lagu guda jiray diyaarinta warbixintan, iyadoo siddeed saxafi iyo shaqaale warbaahineed la dilay, halka 32 kalena dhaawac loo geystay. Al-Shabaab ayaa ahaa kuwaugu weyn ee geystay dilalka iyo dhaawacyada loo geystay saxafiyiinta iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta. Muddadii warbixintan, waxay Al-Shabaab mas'uul ka ahayd dilka saddex saxafi iyo shaqaale warbaahin, waxayna dhaawaceen 30 kale.

Inkastoo tirada saxafiyiinta iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta ee la dilay ay hoos ugu dhaceen boqolkiiba 27 marka la barbardhigo bilihii Janaayo 2014-Agoosto 2016, tirada dadka loo qabtay loona xiray iyagoo lagu eedeeyay arrimo la xiriirta adeegsiga xoriyadda hadalka ayaa kor ugu kacday boqolkiiba 70 iyaga oo dadkaasi ay ka mid ahaayeen, dad ka qaybgalay banaanbaxyo, siyaasiyiin iyo taageerayaal xisbiyo siyaasadeed, kuwo internetka wax ku qora iyo difaacayaasha xuquuqda aadanaha, gabayaa, kuwo u dhaqdhaqaaqa bulshada rayidka ah, odayaal ama

muwaadiniin u banaan baxay midnimada Soomaaliyeed, marka laga reebo saxafiyiinta iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta. Arrimahan ayaa inta badan khuseeya Somaliland marka la eego doorashadii madaxweynenimo ee bishii Nofembar 2017, taageero u muujinta midnimada Soomaaliyeed, iyo colaaddii Tukaraq ee bishii May 2018 ee u dhexeysay Somaliland iyo Puntland.

Ciidamada amniga Soomaaliyeed ayaa mas'uul ka ahaa dhaawaca loo geystay hal saxafi iyo xarig sharci darro ah oo lagu qabtay oo/ama lagu xiray 206 qof oo lala xiriirinayo adeegsiga xaqa ay u leeyihiin xorriyadda hadalka, oo ay ka mid yihiin 94 saxafi iyo shaqaalaha kale ee warbaahineed (oo ay ku jiraan saddex haween ah), iyo 112 siyaasi, difaacayaasha xuquuqda aadanaha, dadka u dhaqdhaqaaqa bulshada rayidka ah, gabayaa iyo banaanbaxayaal.

Intaa waxaa dheer, in intii lagu guday jiray mudada warbixintani ka hadlayso, mas'uuliyiinta hay'adaha qaranka iyo/ama kuwa Dowlad-goboleedyada Federaalka ayaa ama xiray, ama xannibay tebinta wararka 19 xarumo warbaahineed (toddobo xarumo telefishan, shan idaacadood, shan bog internet iyo laba wargeys), kuna eedeeyay inay khatar geliyeen xasiloonida, ama qaarkood xiriir la leeyihiin Al Shabaab, ama faafinta "warar been abuur ah" oo loo arkay inay halis gelinayaan amniga qaranka.

Warbixintan waxay ku celcelineysaa qaar ka mid ah talooyinkii lagu soo jeediyay Warbixintii UNSOM/OHCHR 2016, gaar ahaan in la xaqiijiyo madaxbannaanida warbaahinta, in xeerka warbaahinta la waafajiyo Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah iyo xeerarka iyo halbeegyada goboleed iyo kuwa caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, iyo in la tirtiro sharciyada danbiga ka dhigaya faafinta "wararka beenta ah". Warbixintan waxaa ku jira talooyin cusub si loo xaqiijiyo ilaalinta xorriyadda hadalka ee ay leeyihiin dadka dhammaantood. Waxay sidoo kale ku talineysaa in Dowladda Soomaaliya ay si dhaqso ah u hirgeliso talooyinkii laga soo saarey Warbixintii Dibu-eegis Xiliyeedka Caalamiga ah (UPR) ee la xiriirtay xorriyadda hadalka iyo warbaahinta, ilaalinta saxafiyiinta iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta, maxkamadeynta kuwa geysta xadgudubyada ka dhanka ah shaqaalaha warbaahinta iyo siyaasiyiinta, iyo inay dedejiso sameynta Guddiga Federaalka ee Xuquuqul Insaanka ee Soomaaliyeed.

## Talooyin

### a) Ku Dowladda Federaalka Soomaaliya

1. In baaris buuxda si deg-deg ah, madaxbanaan, dhexdhexaadna ah loogu sameeyo xad-gudubyada xuquuqda aadanaha iyo tacaddiyada saameeya xoriyadda hadalka, iyo in kuwa geysta lala xisaabtamo; lana damaanad qaado xaqa dhibbaneyaashu u leeyihiin magdhowga.
2. In la xaqiijiyo in sharciga saxaafadda uu waafaqsan yahay Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah, xeerarka iyo halbeegyada goboleed iyo kuwa caalamiga ah, oo ay ku jiraan Sharciga Warbaahinta, iyo sidoo kale Xeerka Ciqaabta Soomaaliya marka la eego qodobbada taabanaya "warar been ah" iyo "ku tiri ku teenka" (gaar ahaan qodobbada 208, 212, 328).
3. In la dhiirigeliyo lana abuuro jawi iyo duruufo ay ku horumaraan warbaahin madaxbanaan oo kala duwan; la dhiirigeliyo adeegyo warbaahineed oo dhinacyo badan leh lana xaqiijiyo nabadgelyada saxafiyiinta iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta.
4. In la xaqiijiyo in warbaahinta gaarka loo leeyahay iyo kooxaha bulshada rayidka ah loo ogolaado inay soo xushaan xubnaha Golaha Warbaahinta Madaxabanaan; lagana fogaado in la farageliyo hanaanka xulashada; iyo in la hubiyo in Golaha Warbaahinta uu awood u leeyahay inuu u hawlgalo si waafaqsan xeerarka iyo halbeegyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha.
5. In la dedejiyo hanaanka ansixinta Xubnaha Madaxabanaan ee Guddiga Qaran ee Xuquuqda Aadanaha, iyadoo la eegayo doorka muhiimka ah ee ay tahay inuu ka cayaaro ilaalinta xuquuqda aadanaha; in la xaqiijiyo in Guddigu uu hawlgalo isagoo si buuxda ugu hoggaansan Mabaadi'da Paris ee la xiriirta Xaaladda Hay'adaha Qaran.
6. In la hubiyo in doorka Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka lagu qeexo sharciga laguna nidaamiyo habab kormeer oo wax ku ool ah si looga hortago xadgudubyada ay shaqaalaheedu geystaan iyo in la hubiyo la xisaabtan la xariira eedeymaha xadgudubyada xuquuqda aadanaha.

### b) Ku Dowlad goboleedyada xubnaha ka ah federaalka

7. In dib-u-eegis lagu sameeyo sharciga khuseeya lana/ama la dejiyo sharci cusub si loo xaqiijiyo loona xoojiyo ilaalinta xuquuqda xorriyadda hadalka iyo xorriyadda warbaahinta, iyadoo la raacayo halbeegyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha; in la xaqiijiyo in sharciga cusub lagu dejiyo wadatashi lala yeeshay daneeyayaasha ay arrintu khuseyso, oo ay ku jiraan saxafiyiinta iyo warbaahinta kale, iyo xubnaha bulshada rayidka ah.
8. In la Xoojiyo jawi ay warbaahintu ugu shaqayso si amaan ah, xor ah oo madaxbanaan, oo ay ka mid tahay in la joojiyo wixii faragelin ah ee lagu sameeyo warbaahinta, lagana hortago xariga aan loo aabayeelin ee loo geysto saxafiyiinta iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta.

9. In la sameeyo hanaan ilaalineed, si looga hortago oo wax looga qabto dhammaan noocyada hanjabaadaha iyo weerarrada ka dhanka ah dadka siyaasadda ku lugta leh, saxafiyiinta iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta iyo dadka ka shaqeeya bulshada rayidka, lana hubiya isla xisaabtan marka falalka noocaas ahi dhacaan.
10. In la xoojiyo Guddiyada Xuquuqda Aadanaha ee Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka, Xafiisyada Difaacaha Xuquuqda Aadanaha ee Puntland iyo Guddiga Qaran ee Xuquuqda Aadanaha ee Madaxabanaan - marka la dhiso – iyaga oo la siinayo dhaqaale ku filan si ay ugu suurtagasho inay si firfircoon oo madaxbannaan u shaqeeyaan, taasoo ay ka midtahay inay sameeyaan kormeerka xuquuqda aadanaha.

## c) Ku Saxafiyiinta Soomaaliyeed iyo Ururrada Warbaahinta

11. In la qaato xeer anshax wanaag oo rasmi ah si loo dhiirigeliyo is-nidaamin looguna hogaansamo halbeegyada ugu sarreeya ee anshaxa wariyayaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta.
12. Wariyeyaasho waa inay adeegsadaan luuqad aanay eexi ku jirin, dhexdhexaad ah markay warinayaan geedi socodka siayaasadeed si jidka loogu xaadho doorashooyinka la filayo ee 2020/2021 ee qof iyo codka ah. Kana fogow isticmaalka erayo kicin kara rabshado, u dhigma hadal nacayb ah, isla markaana ka fogow in si aan dheelitirnayn aad u tebisaan wararka xisbiyada siyaasada.

## d) Beesha Caalamka:

13. Inay u doodaan taageeraana hurumarinta iyo difaacida xoriyada hadalka marka ay la macaamilayaan madaxda Soomaaliyeed ee heer fadaraal iyo mid maamul goboleedba isla markaana ay xoriyada hadalka kaga doodaan munaasabadaha iyo madallaha muhiimka ah ee la xariira sida Golaha Xuquuqda Aadanaha, Golaha Guud iyo Golaha Ammaanka.
14. Marka ay taageerayaan qorsha dis-u-eegid sharciyeed, oo ay ka mid yihiin sharciyada ka horimaanaya xaqqa xoriyada hadalka, xaqiiqi in halbeega caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha uu hagayo dooda.
15. Inay u doodaan difaacida suxufiyiinta iyo shaqaalaha warbaahinta iyo jilayaasha kale ee bulshada rayidka, iyo siideynta kuwa sida sharci darada ah loogu xiray sababo la xariira in si sharci ah isla markaana nabad ah ay u qabsadeen howlahooda.
16. Inay taageeraan dhismaha awooda iyo ololayaasha wacyigelinta ee loo sameeynayo saraakiisha sharci fulinta iyo garsoorka, isla markaana la siiyo kaalmo farsamo si loo xaqiijiyo dambi baaris wax ku ool ah, oo ay ka mid tahay baaritaan lagu sameeyo weerarada lagu qaado suxufiyiinta iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta.
17. In weriyayaasha iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta taageero dheeraad ah laga siiyo talaabooyinka sare loogu qaadayo is-ilaalintooda.

18. In la taageero dhisida Gudiga Qaranka ee Xuquuqul Insaanka iyo xoojinta Xafiiska Xuqququl Insaanka ee Puntland iyo Guddiga Xuquuqul Insaanka ee Soomaaliland si ay si waxtar leh ugu howlgalaan xaqqa xoriyada hadalka.



UNSOM